



## Northern Somali Unionist Movement (NSUM)

Iyada oo laga dheregsanyahay dhibaatooyinka kala duwan ee ku habsadey Soomaaliya illaa iyo intii ay burburtay dawladdii dhexe ee Soomaaliya sannadkii 1991;

Iyada oo laga duulayo shidada ay abuureen beelaha ku dhaqan waqooyiga galbeed ee Soomaaliya. Kuwaas oo dhoobdhoobtay maamul kusheeg hal qabiil ka kooban, kuna dhawaaqay in ay ka go'ayaan Soomaaliya inteeda kale, iskuna magacaabay "Somaliland", oo ahaa magacii loo yaqaaney dhamaan gobolada waqooyi ee Soomaaliya xilligii gumaysiga;

Iyada oo laga jawaabayo duulaankii iyo qabsashadii magaala madaxda gobolka Sool (Laascaanood) ay qabsatay beesha ku dhaqan gobolada waqooyi galbeed ee Soomaaliya oo ay horkacayso SNM bishii Oktobar 15-keedii 2007. Kuwaas oo talada dayaysan oo SNM tusay in qabsashada Laascaanood ay u keeneyso ama soo dedejinayso aqoonsigii ay mudada dheer dadkooda ku mihinayeen, in badana aduunweynaha ka jeeqaaqayeen;

Iyada oo la tixgelinayo baaqii Isimada SSC ay ka soo saareen shirkii Boocame ka dhacay Noofambar 2007, baqaas oo si cad loogu muujiyey in gobolada SSC ka tirsanyihiin dawlad goboledka Puntland, isla markaana ku aadanaa sidii looga xoryen laha dhamaan degaanada SSC, gacanta huwanta soo duushey ee SNM horkacayso;

Arrimahaas kor ku xusan oo dhan iyadoo maanka lagu hayo, waxa shirar isdabajoog ah oo ay yeesheen qorbajoogta reer SSC ka dib la goostay in lagu dhawaaqo urur ama dhaqdhaqaaq dallad ah oo metelaya gobolada SSC, una taagan qorbajoogta iyo ururada goboladaas. Ururka waxa loogu walqalay, Ururka Midnimada ee Waqooyiga Soomaaliya (UMWS);

Inkasta oo dadka ururkan soo unkay ka soo jeedaan gobolada SSC, ururka himilooyinkiisa iyo hadafkiisu waa mid ay ku dheehan tahay midnimada soomaaliyeed, ujeedooyinka loo aasaasayna waxaa kamid ah:

- Ilaalinta midnimada Soomaaliya. Taas oo xoojinteeda iyo difaaceeda looga halgamayo heer qaran, qaaradeed iyo heer aduunweyneba. Isla markaasna la is hortaagayo cid kasta oo ku talaabsanaysa kala dhantaalidda midnimada Soomaaliya, ayna ugu horeeyaan beelaha ay SNM hogaaminayso iyo wixii la halmaala.
- In uu ka shaqeeyo sidii gobollada SSC looga xoreyn lahaa beelaha is-huwan ee SNM hormuudka u tahay ee kuu soo qaaday duulaanka qaawan, qaybo ka mid ahina gacantooda ku jiraan.
- In lagu dadaalo sidii loo horumarin lahaa xasiloonida iyo nabadgelyada gobolada SSC iyo beelaha dariska la ah.



*Northern Somali Unionist Movement (NSUM) is a grass roots Somali organization whose members and supporters hail from Sool, Sanaag and Cayn regions in the Northern regions of Somalia (formerly British Somaliland) and whose clan in these regions do not identify with the one-clan-driven secession calling themselves "Somaliland". NSUM stands for the promotion of peace and unity among the long-suffering people of Somalia.*

*InfoDesk\_2008-02-03(1afs)*

- In la xoojiyo midnimada dadka reer SSC, lana adkeeyo dhaqanka walaanimada, wada dhalashada iyo wada noolaanshaha, lagana feeyigaado wixii kala dhantaalaya midnimadooda iyo horumarkooda.
- In bulsha weynta SSC lagu wacyi geliyo kala dambaynta lana tuso wanaagga ka dhalan kara kor u qaadidda adeegyada kala gedisan ee bulshadu u baahantahay sida: daryeelka caafimaad iyo waxbarashada.
- In gacan laga geysto sidii loo gaadhi lahaa xukun soo hooya ama looga aayo dimoqraadiyad, xorriyad iyo sinaan heer qaran iyo mid gobolba.
- In loo qalabqaato lana badhitaaro horumarka bulshada SSC iyada oo il garaa lagu eegayo dhaqaalaha bulshada iyo siyaasada, gacansaarna lala yeelanayo ururada ka jira wadanka gudihisa iyo kuwa caalamiga ahba.

Si ay u hirgalaan ujeedooyinka iyo himilooyinka kor ku xusani, UMWS wuxu wada shaqeen la yeelandoonaa dhamaan ururda kale ee sida gaarka ha ugu feydan nabadda, midnimada iyo hurmarka gobolada SSC iyo guud ahaan soomaaliweyn sida: dawlad goboleedka Puntland, dawladda federalka soomaaliyeed, dawladdaha shisheeye ee horumarka taageera, hay'adaha caalamiga ah iyo hay'adaha samafalka.

Gudoomiyaha, NSUM  
Mohamed Ali Mirreh



*Northern Somali Unionist Movement (NSUM) is a grass roots Somali organization whose members and supporters hail from Sool, Sanaag and Cayn regions in the Northern regions of Somalia (formerly British Somaliland) and whose clan in these regions do not identify with the one-clan-driven secession calling themselves "Somaliland". NSUM stands for the promotion of peace and unity among the long-suffering people of Somalia.*

*InfoDesk\_2008-02-03(1afs)*